SOMALI

Jaartarka Australia ee Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka Fiktooriya

AUSTRALIAN COMMISSION ON SAFETY AND QUALITY IN HEALTHCARE

A Victorian Government initiative

Victoria The Place To Be

Jaartarka Australia ee Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka

Jaartarka Australia ee Xuquuqda Daryeelka Caafimaadku wuxuu sharxaa xuquuqda bukaanka, macaamiisha iyo dadka kale ee isticmaalaya nadaamka daryeelka caafimaadka Australia. Xuquuqdaani waa lagama maarmaan si loo xaqiijiyo in, mar kasta iyo meel kasta oo lagu bixiyo daryeel caafimaad, uu leeyahay tayo iyo amaan sarreeya.

Jaartarku wuxuu aqoonsadaa in dadka hela daryeelka caafimaadka iyo dadka bixiya daryeelka caafimaadka kulligood leeyihiin door fiican oo ay ka cayaaraan helida xuquuqda daryeelka caafimaadka. Waxay u ogolaataa bukaanka, qoysaska, daryeelayaasha iyo adeegyada bixiya daryeelka inay la qaybsadaan oo fahmaan xuquuqda dadka hela daryeelka caafimaadka. Fahamkaas la wadaagayaa wuxuu caawimaa qof walbaa inuu wadajir ugu shaqeeyo sidii loo heli lahaa nadaam daryeel caafimaad oo leh taya sarre oo amaana. Hawl wadaag dhab ah oo ka dhexeeya bukaanada, macaamiisha iyo kuwa adeega waa muhiim si qof walbaa u gaaro natiijada ugu fiican o suurtagalka ah.

Mabaadiida hagaysa

Mabaadiidaani waxay sharaxdaa sida jaartarkaani u khuseeyo nadaamka daryeelka caafimaadka Australia.

1. Qof walbaa wuxuu xaq u leeyahay inuu awoodo inuu hello daryeelka caafimaadka xuquuqdaasna lagama maarmaan ayay u tahay jaartarka si uu macne u yeesho.
2. Xukuumada Australia waxaa ka go'an raacida heshiisyada caalamiga ah oo ku saabsan xuquuqda aadamiga kuwaas oo aqoonsanaya xuquuqda qof walba si loo hello mustawaha ugu sarreeya oo suurtagalka ah iyo caafimaadka jirka iyo dhimirka.
3. Australia waa bulsho ka kooban dad leh dhaqama kala duwan iyo habab nololeed, jaartarkuna wuxuu aqoonsadaa oo ixtiraamaa kala duwanaantaa.

Xuquuqdaada *Jaartarka Australia oo Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka*

- **Helida** – xuquuqda lagu helo daryeelka caafimaadka.
- **Amniga** – xuquuqda lagu helo amaan iyo daryeel caafimaad oo sarre.
- **Ixtiraam** – xuquuqda in laguu muujiyo ixtiraam, laguulana dhaqmo si sharaf iyo qadarin leh.
- **Wada-xiriir** – xuquuqda in laguu sheego wixii ku saabsan adeeyada, daaweynta, xalalka iyo qiimaha si waadax ah oo furan.
- **Ka qaybgelid** – xuquuqda lagaga qaybqaadanayo go'aanada laguna kala dooranayo daryeelka caafimaadkaaga wixii ku saabsan.
- **Barayfasiga** – xuquuqda barayfasigaaga iyo qarsoodiga macluumaadkaaga shakhsiyeed.
- **Wax ka dhihid** – xuquuqda wax laga waranayo daryeelka caafimaadkaaga, iyo wax ka qabashada waxaad ka welwelayso.

Jaartarku muxuu Fiktooriya u qabtaa?

Qoraalkaani wuxuu sharxaa Jaartarka *Australia ee Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka* iyo wuxuu adiga kuu qabanayo bukaan, macmiile, xubin qoys ama daryeele isticmaalaya nadaamka daryeelka caafimaadka Fiktooriya ahaan. Wuxuuna bedelayaa Jaartarkii Bukaanka Dadweynaha.

Xuquuqdaasi waxay khusaysaa dhamaan adeegyada daryeelka caafimaadka Fiktooriya. Kan waxaa ku jira kuwa isticmaala isbitaalada gaarka loo leeyahay iyo kuwa guud, rugaha dhakhtarada guud, kuwa takhasuska ah, daryeelka dadka waaweyn iyo adeegyada kuwa iinta leh, adeegyada caafimaadka dhimirka, xarumaha caafimaadka bulshada, dhakhtarada ilkaha, daaweynta dabiiciga ah iyo mihnad u daaweynta.

Wixii ku saabsan qoraalkaan

Qoraalkaani wuxuu kuu sheegayaa waxaad ka filan karto adeegyada daryeelka caafimaadka Fiktooriya iyo meesha laga helayo caawimo haddii aad dareen ka qabto adeegaad raadinayso ama hesho.

Xuquuqda daryeelka caafimaadka iyo xuquuqda aadamiga

Xukuumadaha Australia iyo Fiktooriya waxaa ka go'an wax ka qabashada heshiisyo caalami ah oo xuquuqda aadanaha kuwaas oo aqoonsada xuquuqda qof walbaa u leeyahay mustawaha ugu sarreeya oo dhici kara oo caafimaadka dhimirka iyo midka jireed. Waxay aqoonsadaan xuquuqdaada daryeel caafimaad iyo adeegyada kale oo muhiimka u ah caafimaadka kuwaas oo ay ku jiraan biyo nadiif ah, degaan iyo waxbarasho la xiriirta caafimaadka.

Fiktooriya, adeegyada caafimaad oo ay kharajkiisa bixiso dawladu waa inay waafaqsan yihiin Jaartarka Xeerka Masuuliyaadka iyo Xuquuqda Aadanaha ee 2006, kaas oo ilaaliya xuquuq badan oo Aadami. Booqo www.patientcharter.health.vic.gov.au si aad u barato wixii ku saabsan sida kani u saamayn karo xuquuqdaada daryeelka caafimaadka.

Macaamiisha, bukaanka iyo adeegbixiyayaasha

Macaamiishu waa dadka hadda isticmaala ama laga yaabo inay isticmaalaan daryeelka caafimaadka, kuwaas oo ay ku jiraan bukaanada isbitaalka. Waxaana ka mid ah kuwaas caruurta, dumarka iyo ragga; dadka qaba iinta; dadka dhaqamada iyo diimaha kala duwan, xaallada dhaqaala-bulsho iyo xaallada bulsho, nooca rabitaanka galmoodka iyo shuruudaha caafimaadka.

Bixiyaha daryeelka caafimaadku waa mihnadle loo tababaray caafimaadka oo bixiya daryeelkaaga. **Adeega daryeelka caafimaadku** waa ururka masuulka ka ah bixinta adeega daryeelka caafimaadka.

Helitaanka

Waxaad xaq u leedahay daryeelka caafimaadka aad u baahan tahay. Xuquuqdaan waxaa kaalmeeya Medicare, kaas oo bixiya habkii lagu heli lahaa daaweyn la kabay oo dhakhtar bixiyo, iyo helida adeega isbitaalka dadweynaha.

Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad oo taya fiican leh kaas oo wax ka qabta baahida caafimaadkaaga. Nadaamka daryeelka caafimaadka Fiktooriya waxaa ka mid ah **adeegyo badan oo kala nooc ah**. Helida daryeelka aad u baahan tahay waxay macneheedu tahay u xawilida adeegyo kala duwan oo aan ahayn midkii aad markii hore booqatay.

Waxaa laga yaabaa inaad doorato inaad noqoto **bukaan gaara ama mid guud**. Fiktooriya isbitaaladeeda dadweynaha waxaad tahay bukaan guud, lagaana qaadi mayo kharajka isbitaalka ama adeega caafimaadka. Haddii aad tahay bukaan gaara, adiga iyo caymiskaaga ayaa laga qaadi doonaa adeegyada qaarkood. Adeega caafimaadkaagu waa inuu sharxaa qiima kasta ama faraqa ka yimid daryeelkaaga haddii aad ahayd bukaan gaara.

Waxaa laga yaabaa in laga qaado lacag yar oo daryeelka caafimaadka dadweynaha sida ilkaha ama dabiici ku daaweynta.

Amniga

Waxaad xaq u leedahay amaan iyo daryeel tayo sarre leh. Bukaanada, macaamiisha iyo bixiyayaasha daryeelka waxay dhamaantood xaq u leeyihiin amaan, iyo bay'ad daryeel caafimaad oo la kaalmeeyo oo xafidan.

Waxaad xaq u leedahay **daaweyn iyo daryeel amaana** oo mustawa sarre leh. Fadlan **u sheeg shaqaalaha** haddii aad dareen ka qabto amniga ama aad u malaynayso in qalad la sameeyey.

Xuquuqdaada amaan iyo daryeel taya sarre lihi wuxuu qayb ahaan ku xiran yahay **wada-xiriir waadax ah**. Tan macneheedu waxa weeye waxaad siinaysaa daryeel-caafimaad bixiyaahaga macluumaadka ay u baahan yihiin si ay kuu daaweeyaan, daryeel bixiyahaaguna wuxuu kuu sheegayaa waxaad u baahan tahay inaad ogaato si aad go'aan uga samayso daryeelkaaga.

Waxaad xaq u leedahay **mutarjum aqoonsi** leh haddii aad mid u baahan tahay markaad isticmaalayso **adeega daryeelka caafimaadka dadweynaha**, sida isbitaalka ama xarunta caafimaadaka bulshada.

Adeegyada daryeelka caafimaadka oo dhan waa inay ku da'daalaan joogto u wanaajinta tayada daryeelka. Adeega caafimaadka dadweynuhu joogto ayuu ugu warbixiyaa bulshada iyaga oo ku soo gudbinaya warbixinta daryeelka tayada sanadeed.

Ixtiraam

Waxaad xaq u leedahay in laguu muujiyo ixtiraam, in laguula dhaqmo si sharaf iyo qadarin leh, oo ka banaan takoorid. Adeegyada daryeelka caafimaadka waa inay abuuraan bay'ad caawinta iskaashiga iyo wada-xiriirka u dhexeeya bukaanada, macaamiisha iyo shaqaalaha.

Waxaad xaq u leedahay in laguula dhaqmo **si ixtiraamaysa sharaftaada**. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxay iyaguna mudan yihiin in loola dhaqmo si ixtiraam iyo qadarin leh, kana banaan takoorid.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeeg u **nugul dhaqankaaga iyo caqiidadaada** sida waxaad aaminsan tahay iyo sidaad wax uga qabato dhalashada, jirada iyo dhimashada, sinjiga qofka la dawaynayo, ama nooca cuntada aad rabto intaad isbitaalka ku jirto.

Waxaad xaq u leedahay inay laguu daweeyo **takoorid la'aan** iyada oo aan la eegayn jinsiyada, da'da, sinjiga, wuxuu sheegto jinsi ahaan, waxa qof ka helo xagga galmada, xaallada daryeelaha, iinta, xaallada guurka ama caqiidada diinta.

Sida ugu macquulsan, daryeelayaasha caafimaadku waa inay ku bixiyaan daaweynta **bay'ad u ogolaata barayfasi shakhsiyeed**.

Wada-xiriirka

Daryeelka caafimaad oo tayada sarre lihi wuxuu ku xiran yahay wada-xiriir laba dhinac ah oo u dhexeeya adiga iyo cidda bixisa daryeelka caafimaadka. Waxaad xaq u leedahay in laguugu sheego adeegyada, daaweynta, xalalka iyo qiimaha hab aad fahmi karto.

Waxaad xaq u leedahay **macluumaad waadax ah oo la fahmi karo** oo ku saabsan daryeelkaaga caafimaad oo ay ku jirto xalalka daaweynta, natiijada la filayey, qiimaha iyo dhibta ay keeni karto daawadu. Kuwa ku siiya daryeelka caafimaadka waa inay ku siiyaan fursada ay kugu weydiin karaan su'aallo.

Haddii aad qabto dareen ku saabsan xalalka daaweynta ee uu bixiyey daryeelka caafimaadku, waxaad xaq u leedahay inaad hesho **aragti labaad oo caafimaad**.

Waxyaalla badan ayaa saameeya caafimaadkaaga: taariikhdaada, daawada iyo daawada siyaadada ah oo aad qaadanayso, xaallada bulsho iyo samaqabka shucuureed. **Waa muhiim inaad siiso bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga dhamaan macluumaadka khuseeya xaalkaaga**, si ay kuu siiyaan daaweynta ugu fiican.

Waxaad xaq u leedahay inaad u hesho **mutarjum aqoonsi leh waxaad uga baahan tahay adeega daryeelka caafimaadka dawladu kharajkiisa bixiso**. Mutarjumiinta waxaa lagu bixiyaa xaalladaha ugu muhiimsan inta lagu daryeellayo, sida marka laga wada hadlayo taariikhda caafimaadka, daaweynta, natiijada baarista, magacbixinta jirada, xilliga jiifinta iyo qiimaynta marka lagaaga baahan yahay inaad bixiso raalinimada aad warqabto.

Haddii aad tahay bukaan ama macmiile oo aad joogto isbitaal ama adeeg daryeel caafimaad oo weyn, waxaa laga yaabaa inay ku daaweeyaan dad badani. Waxaad xaq u leedahay in laguu sheego wixii ku saabsan **yaa masuul ka ah daryeelkaaga**, iyo sida loola xiriiro.

Waxaad xaq u leedahay in **xubin qoyska ka mid ahi lug ku leedahay sida daryeelle ama qof kaalmo bixiyaa** uu kaaga caawimo inaad la xiriirto bixiyaha daryeelka caafimaadka. Qofkaasi wuxuu noqon karaa saaxiib ama xubin qoyska ka mid ah ama qof ka socda ururka kaalmaynta macaamiisha. Tusaale ahaan, Isbitaalada Fiktooriya badankood waxay leeyihiin sarkaalka u qaybsan Aborijinaalka. Arag qoraalkaan gadaashiisa wixii faahfaahin ah.

Ka qaybgelid

Waxaad xaq u leedahay inaad qayb firfircoon ka qaadato daryeelka caafimaadkaaga waa in lagugu daraa go'aankaaga iyo doorashada ku saabsan daryeelkaaga.

Waxaad xaq u leedahay **inaad si buuxda uga qaygasho go'aanada ku saabsan daryeelkaaga iyo daaweyntaada**. Daryeel bixiyahaagu waa inuu ku siiyo dhamaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad u samayso go'aan warqab ah, fursad aad ku weydiiso su'aallo, iyo waqti aad kula hadasho daryeellayaashaada, qoyska iyo saaxiibadaa ka hor inta aadan go'aan samayn.

Waxaad **xaq u leedahay inaad hesho qoyskaaga, daryeelayaasha kale ama qof loo doortay** bixinta kaalmada daryeelkaaga. Raalinimadaada, waxay heli karaan macluumaad waxayna lug ku yeellan karaan inay kula sameeyaan go'aanada wixii ku saabsan adiga daryeelkaaga.

Waxaad **xaq u leedahay inaad diido daaweynta**. Si kasta ha ahaatee waxaa jira xaallado laguu arki karo in aadan bixin karin raalinimo warqab ama aad diido daaweynta.

Waxaad xaq u leedahay inaad magacawdo **qof adiga kuu sameeya go'aan daaweyneed** markay dhacdo inaad lumiso awooda sidaas lagu sameeyo. Macluumaad intaas ka badan la xiriir Xafiiska U hadlida Dadweynaha – arag qoraalkaan gadaashiisa meesha lagala xiriirayo.

Haddii aad isbitaal ku jirto, waxaad xaq u leedahay inaad lug ku yeelato go'aanada ku saabsan **sidaad uga baxayso iyo markaad ka baxayso isbitaalka**. Ka hor inta aadan bixin, isbitaalku waa inuu kaala hadlaa adeegyada daryeelka caafimaadka laga yaabo inaad u baahan tahay in laguu xawilo markaad ka baxdo isbitaalka. Waxaad xaq u leedahay inaad ka qaybgasho go'aanada ku saabsan daryeelkaaga. Dhakhtarkaagu waa inuu qayb ka qaataa. Waxaa laga yaabaa inaad adigu iska saarto isbitaalka iyada oo aan dhakhtarku ogolaan, laakiin waxaa laga yaabaa inaad saxiixdo in aad taas masuuliyadeeda qaadayso.

Waxaa jira fursada badan oo **lagaga qaybgalo qorshaynta, habaynta iyo qiimaynta adeegyada daryeelka caafimaadka dadweynaha**. Urura badan ayaa qadariya khibradaha macaamiisha iyo fikradaha ku saabsan adeegyadooda markay hagaajinayaan. Waxaad xaq u leedahay inaad la qaybsato aragtida, tusaale ahaan adiga oo buuxinaya sahanka, ka qaybgelaya guddiga talasiinta bulshada, qoraya warqado ama u sheegaya shaqaalaha wixii ku saabsan khibradaada. Labada aragtiyood dhaliil iyo amaanba faaiido ayay leeyihiin.

Barayfasi

Sharciyada Australia iyo Fiktooriya waxay xafidaan barayfasiga iyo qarsoodiga caafimaadkaaga shakhsiyeed iyo macluumaadka kale. Macluumaadka waxaa waajiba in la ururiyo, la isticmaalo oo lala qaybsado si waafaqsan shuruucdaan.

Qof kasta oo lug ku yeesha daaweyntaada oo daryeella **wuxuu leeyahay masuuliyada sharci iyo mihnadeed oo lagu xafido qarsoodigaaga**. Mararka qaarkood bixiyaha daryeelka caafimaad wuxuu u baahan yahay inuu la qaybsado macluumaad ku saabsan daryeelkaaga. Waxay kula wadaagayaan keliya macluumaadkaaga qof aan arrintaada lug ku lahayn **adiga ogolaanshahaaga. Xeerka Diiwaangelinta Caafimaadka Fiktooriya ee 2001** wuxuu dhigay mabaadii taas oo ay tahay inay adeegyada caafimaadku dhamaantood raacaan.

Waxaad xaq u leedahay inaad inaad aragti ka dhiibato **wixii ku dhacay macluumaadkaaga**. Haddii aad go'aan ka gaarto in aadan la qaybsan qaar ka mid ah macluumaadkaaga ama aadan xanibin in la helo diiwaanka caafimaadkaaga, taasi waa xaqaaga, laakiin waxaa laga yaabaa inay wax yeesho awooda bixiyaha daryeel bixiyahaaga si ay kuu siiyaan daryeelka ugu fiican.

Waxaad xaq u keedahay inaad hesho **diiwaanka caafimaadkaaga**. Fadlan u sheeg daryeel bixiyahaaga haddii macluumaad aanu dhamayn, qaldan yahay, ama mudadiisii dhamaatay. Xaalladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo qayb k amid ah diiwaankaaga. Wedii wakiilka bukaanka ama shaqaalaha ay khusayso macluumaad intaas ka badan – arag qoraalkaan gadaashiisa wixii faahfaahin ah.

Wax ka dhihid

Waxaad xaq u leedahay in aad wax ka tiraahdo daryeelkaaga, waxna laga qabto waxaad ka welwelsan tahay. Adeegyada daryeelka caafimaadku waa inay macluumaadkooda ku saabsan habka aragti dhiibashada ka dhigaan mid sahal lagu heli karo.

Waxaad xaq u leedahay **inaad wax ka tiraahdo, su'aalla ka weydiiso kana dacwooto** wixii ku saabsan daryeelka caafimaadka.

Had iyo jeer way fiican tahay **inaad isku daydo xalinta dhibtaada daryeel bixiyahaaga** marka hore. Adeegyada daryeelka caafimaad waxay doonayan inay ku xaliyaan dhibta si degdeg ah, laakiin waxay u baahan yihiin inay ogaadaan dhibta marka hore. Isku day inaad u bixiso aragtidaada si ixtiraamta macmiilayaasha kale iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka.

Adeega daryeelka caafimaadku wuxuu **diiwaangeliyaa aragtida la dhiibto ama dhaliil ama amaan kay tahayaba**, tusaale ahaan iyada oo la qaadayo sahan, aragti dhiibasho iyo cabasho. Aragtida aad dhiibato waa in loo isticmaalo wanaajinta adeegyada mustaqbilka.

Isbitaalka, haddii aadan ku qanacsanayn sida dhakhtarkaaga ama kooxda daaweyntu ay wax uga qabanayaan dareenkaaga, waxaad xaq u leedahay **inaad la hadasho wakiilka bukaanka isbitaalka**.

Haddii aadan ku qanacsanayn sida adeega daryeelka caafimaadku ama bukaanku wax uga qabanayaan welwelkaaga, waxaad xaq u leedahay **inaad u dacwooto Xubinta Adeegyada Caafimaadka Fiktooriya**. Arag qoraalkaan gadaashiisa faahfaahinta cidda lala xiriirayo.

Macluumaad intaas ka badan

Isticmaalida Jaartarka

Macluumaad qaran oo intaas ka badan oo ku saabsan Xuquuqda Daryeelka Caafimaadka Jaartarka Australia waxaa laga helaa www.safetyandquality.gov.au. Booqo www.patientcharter.health.vic.gov.au si aad u barato wax badan oo ku saabsan sida Jaartarku u shaqeeyo Fiktooriya, kuwaas oo ay ka mid yihiin macluumaad lagu caawimo isticmaalka Jaartarka shaqadooda.

Kaalmooyinka ku jira adeega daryeelka caafimaadkaaga

Isbitaalada waaweyn waxay leeyihiin wakiilka bukaanka, badankoodna sarkaalka u-qaybsanaha Aborijinaalka. Adeegyo badan oo caafimaad ayaa leh u doodaha daryeelaha. Adeegaaga daryeelka caafimaadka waxaa lagu taxay meesha lagala xiriiro shaqaalaha ee hoose.

Adeegyada caafimaadka dadweynaha ayaa heli kara mutarjumiinta la aqoonsan yahay. Waxaa laga yaabaa in laga helo goobta ama lagu heli karo telefoonka hay'adaha dibada ka ah.

Meelaha lala xiriirayo oo muhiimka ah

Ururadaani waxay caawimi karaan xalinta dacwada, ama way ku kaalmaynayaan macmiile ahaan. Booqo www.patientcharter.health.vic.gov.au xiriira badan oo muhiima oo intaas ka badan.

Xubinta Adeegyada Caafimaadka (Health Services Commissioner)

Tel: (03) 8601 5200
Lacagla'aan: 1800 136 066
TTY: 1300 550 275
Address: 30th floor, 570 Bourke Street, Melbourne Victoria 3000
Websayt www.health.vic.gov.au/hsc

Xubinta Adeegyada Iinta (Disability Services Commissioner)

Tel: 1300 728 187
lacag la'aan: 1800 677 342
TTY: 1300 726 563
Email: complaints@odsc.vic.gov.au
Cinwaan: 30th floor, 570 Bourke Street, Melbourne Victoria 3000
Websayt: www.odsc.vic.gov.au

Guddiga Xuquuqda Aadanaha iyo U-sinaanta Fursadaha (Victorian Equal Opportunity and Human Rights Commission)

Tel: (03) 9281 7100
TTY: (03) 9281 7110
Email: complaints@veohrc.vic.gov.au
Cinwaan: Level 3, 380 Lonsdale Street, Melbourne VIC 3000
Websayt: www.equalopportunitycommission.vic.gov.au

Xafiiska U-dooda Dadweynaha (The Office of the Public Advocate)

Tel (lacag la'aan): 1300 309 337
TTY: (03) 9603 9529
ACE: 133677 (03) 9603 9500
Cinwaan: Level 5, 436 Lonsdale Street, Melbourne Victoria 3000
Websayt: www.publicadvocate.vic.gov.au

Haddii aad qabto welwel ama su'aallo ku saabsan daryeelkaaga adeegaan, fadlan la xiriir:

(Fadlan ku qor sarkaalka U-qaybsanaha Aborijinaalka iyo bukaanka meesha lagala xiriiro halkan)

A Victorian Government initiative